



Xubnaha ka tirsan bulshada oo la kulmay golaha Guddiga kala taliya dhanka miisaaniyadda

Haddii aad jeelaan in aad cod ku yeelato arrimaha miisaaniyadda ee Dugsiyada Dadweynaha Portland, waxaa jirta fursad la helayo. Codsiyada ayaa la aqblayaa kuwaasi oo loogu talagalay afar boos oo ka bannaan Guddiga Dib u Eegista Miisaaniyadda Bulshada (CBRC), oo uu ku jiro hal arday oo wakiil ah.

CBRC waxay ka kooban tahay sideed ilaa 12 xubnood oo tabarucayaal ah. Waxay dib u eegtaa, qiimeysaa isla markaana talooyiin ka siisaa Guddiga Waxbarashada miisaaniyadda sanadlahaa ah ee uu soo jeediyay Kormeeraha guud ama arrimaha kale ee miisaaniyadeed ee ka jira PPS. CBRC waxay sidoo kale kormeertaa isla markaana kala talisaa Guddiga sida ay degmadu u isticmaasho lacagta laga helo canshuur la isku soo rogo ee degaanka ee la kala dooranayo.

Golaha waxaa magacaabay guddiga, oo ay wehilayaan xubno tabarucuyaal ah oo haya xil laba sano ah, iyo arday wakiil ah oo shaqeynaya hal sano. CBRC waxay sida caadi ah kulmaan bil walba inta lagu jiro xilliga dejinta miisaaniyadda.

Kooxaha danaynaya waa inay [soo dejiyaan/min guuriyaan arjiga codsi](#) isla markaana ay email ahaan ugu soo diraan dlstone@pps.net. Taariikhda u dambeysa oo loo qabtay in la codsado waa Jimcaha, Sibtambar 28.

Wixii macluumaad dheeraad ah, booqo [Website-ka PBRC](#) ama Agaasimaha Miisaaniyadda ee Ku meel gaarka, Ryan Dutcher, kala xiriir 503-916-3011 ama rdutcher@pps.net.